



## Barnaamijka Iskaa-wax-u-qabso

San Diego City Schools waxaa hada si iskaa-wax-u-qabso ah kaga shaqeysa dadka ay tiradoodu gaadheeyso ilaa iyo 23,000 oo qof, oo meelo kala duwan ka shaqeeya. Dadkaas iskaa-wax-u-qabsada ku shaqeeya waxay isugu jiraan – waalidiin, jaalalka gancasiga/jaaliyada, xubnaha jaaliyada, ardeyda kuleejada, ardeyda fasalada Xanaanada ilaa iyo 12aad, dadka waayeelka ah iyo kuwo kaleba – dadkaasu waxay qeyb yar ka meteleyaan arrimaha dhaqaalaha, bulshada, jinsiyadaha, diimaha iyo meelaha ay waxbarashadoodu ka soo jeedo ee jaaliyadaha San Diego dhexdeeda ku nool.

**Dadka iskaa-wax-u-qabsada ku shaqeeya waxyaabahan hoos ku qoran ayey qabtaan:**

- Wax barid
- La-talin
- Kaalmeynta fasalka
- Ka caawin marka kor wax loo akhrineyo
- Hadba intey fasal galaan ay ardeyda wax la akhriyaan
- Dhacdooyinka Dugsiga/fasalka sida bandhiga shaqooyinka, orodka ruclaha dheer ah ee lagu tartamo, safarada loo baxayo, iwm.
- Barnaamijyada dugsiga ka hor ama kedib ee ardeyda wax loo dhigo
- Kaalmada meel aan fasal ahayn sida kaalmeynta xafiiska dhexe, xarunta maktabada /warbaahinta, iwm
- Ka qeybgelida ama xubin ka noqoshada guddiga qiimeeya hawlaha ardeyda iyo badndhiga ay sameyneyaan ardeyda sannadkaas dugsigu ugu dambeeyo
- Ka qeybgelida ururada iyo guddiyada jaaliyada iyo dugsiga sida kooxda maamusha aaga, ururada samafalka, Ururka Waalidiinta iyo Macallimiinta(PTA)
- Booliiska Dugsiga ee Iskaa-wax-u-qabso Kormeerka ku sameeya (Waalidka Kormeeraha ah)

Waaxda Xidhiidhka Jaaliyaduhu waxay caawiyaan dugsiyada si ay ugu sahlaan barnaamijyada iskaa-wax-u-qabso ah ee ay wadaan. Dhammaan dugsiyada waxaa la fareyaa inay iskuduwe iskaa-wax-ku-qabso ku shaqeeya dugsigooda ka magacaabaan. Iskuduweyaashaas iskaa-wax-u-qabsada ku shaqeeya waxaa sannad kasta loo furaa shirar iyo tababaro. Shirarkaas waxay dadka ka soo qeybgalaya ka helaan warbixino aad muhim u ah, tabaha iyo siyaabaha ay ku caawin lahaayeen waalidinta iyo jaaliyadaha si ay u gutaan hawlaha dugsiga ka socda. Buugaag tilmaan-bixin ah ayaa loo qeybiyaa iskuduweyaasha iskaa-wax-u-qabsada ku shaqeyneya. Waaxda Xidhiidhka Jaaliyaduhu waxay dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeyneya siiyaan buugaag tilmaan-bixin ah iyo tababaro waxbarasho marka ay codsi ka helaan dugsiyada iyo ururada jaaliyadaha ama ganacsatada. Dhammaan dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeyneya waxaa looga baahan yahay inay cudurka qaaxada iska so baadhaan, isla mar ahaantaasna, arji soo buuxiyaan.

Dhammaan shaqooyinka ay qabanayaan dad iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya waxyaabaha ay qabanayaan waxaa u tilmaameya macallin loo xil saarey, iskuduwaha iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya ee aaga, maamulaha ama maamule ku-xigeenka, kuwaas oo ay soo tababartey Waaxda Xidhiidhka Jaaliyada. Dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya waa inay u hoggaansanaadaan nidaamka dugsiga ee marka shaqada la soo galo waraaqda la saxiixayo.

*Somali Version. VOLUNTEER PROGRAM FACT SHEET, FALL 2003*

*Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation*

La xidhiidh: Waaxda Xidhiidhka Jaaliyada: (619) 725-5592  
Su'aalaha warbaahinta: (619) 725-5578

[www.sandi.net/partners](http://www.sandi.net/partners)

San Diego City Schools(SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 140,000 oo ardey, waxayna leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo 17,000 oo shaqaale ah. DMS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageerto dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

*"Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdisa ah."*

### OO KOOBAN

- ❖ In ka badan 23,000 oo iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya
- ❖ Sannadkii 2002-03 dadka iskaa-wax-ku qabso ku shaqeeya waxay shaqeeyeen 650,000 oo saacadood
- ❖ Sannadkii 2002-2003 saacadaha iskaa-wax-u-qabso lagu shaqeeyey waxay qiyaastii u dhigmaan \$11,000,000 (taas oo qiimaha saacadii u dhiganta \$16.54 sida ay ha'ayad madaxbannaan ku qiyaastey)
- ❖ Sannadkii 2002-2003 qiyaas dhan 70% waxay daku iskaa-wax u-qabso kaga shaqeeyeen fasalada.